

Macluumaadka Mashruuca Upper Harbor

Qorshaha Horudhaca ah ee mashruuca waa mid ay dadweynuhu ra'yigooda ka dhiiban karaan.



Waxa aad kaga dhiiban kartaa ra'yigaaga Qorshaha Mashruuca sahanka barta internetka ee bogga internetka ee mashruuca laga bilaabo 15ka Janaayo 2021. Kulanka dadweynaha u furan ee barta internetka waxaa la qabanayaa 15ka Diseembar iyo bilowga Janaayo. Si aad wax uga ogaato Qorshaha Horudhaca oo aad uga qeyb qaadato sahanka barta internetka, fadlan soo booqo upperharbormpls.com.

Dib u casriyeynta Upper Harbor waxa uu dhalinayaa fursad uu jiil jiil ka dhaxlo oo lagu abuurto hanti balaaran bulshada oo dhan u dhaxeysa ee Waqooyiga Minneapolis, iyada oo loo dhisay hab u dib soo celin ah oo ku saleysan sugitaanka garsoorka ee qowmiyadaha kala duwan, taasoo muhimadda koowaad ee dadka deggan degaanka.

Tan iyo 2019kii, waxa ay magaalada Minneapolis, Gudiga Qorsheynta ee Upper Harbor Terminal (UHT CPC), United Properties iyo First Avenue si wadajir ah uga shaqeynayaan dib u dayactirka Upper Harbor iyadoo qeyb ka ah Waqooyiga Minneapolis. Tan iyo sanadkii 2019 iyo 2020, talo soo jeedinta UHT, CPC iyo ka qeyb gelinta bulshada (oo ay kulamada qabanqaabiyeen Gudiga Mashruuca Garsoorka Degaanka Iyo Siyaasadaha Dadweynaha) ayaa dhalisay Qorshaha Horudhaca ah oo ay xudun u tahay:

- Isku dhafka dhaqaalaha
- In aan la baro kicin oo aan la sal guurin
- Abuuritaanka dhaqaale iyo Lahaashaha Bulshada
- Guryo dadku awoodi karaan
- Garsoorka Degaanka iyo Joogteyntiisa
- Dhaqdhaqaaqa Iyo Goobo Dadweynuhu ku Kulmaan

Dib u casriyeynta Upper Harbor ee lagu talinayo waxa:

- Ay North Minneapolis ku xireysaa Wabiga Mississippi.
- Ay xaqiijineysaa lahaashaha dhulka ee dadweynaha.
- Abuureysaa jardiino iyo wado lugeedyo 19 akre ah
- Ay hergelineysaa Xarunta Farshaxanka Bulshada iyo
- Goobta Fayo Qabka Bulshada
- Ay abuureysaa guryo la kireysto ama la gadan karo oo dadku awoodo
- Gaar ahan dadka iminka deggan Waqooyiga Minneapolis.
- Ay abuureysaa fursado lahaasho oo bulshada ah.
- Ay keeneysaa fursado shaqo oo mushahar lagu noolaan kara bixiya oo kor u dhafaya 300+ ee dhinaca Waqooyiga